


Zama waa mid aad u wanaagsan!



- Michael Oguttu
- Vusi Malindi
- Abdi Muse
- Somali
- Level 2




Walaalkeyga yar wuxuu seexdaa waqti dambe. Anigu waxaan soo toosaa xilli hore, maxaa yeelay waa mid aad u wanaagsan!




Anigu waxaan ahay kan qorraxda
soo bixiyo.

"Waxaad tahay xiddigta
subaxdayda," ayuu yidhi Mama.







Anigu waan maydhaa, ma u baahni
wax caawin ah.



Waxaan u dul qaadan karaa biyo
qabow iyo saabuun shiirayso oo
buluug ah.



Mama aya i xasuusiyo, "Ha iloobin ilkaha." Waxaan ku jawaabaa, "Marnaba, aniga ma ihi!"




Ka dib markii aan maydho, waxaan salaamaa awoowe iyo eedo, oo waxaan u rajeeyaa ayaga maalin wanaagsan.




Dabadeedna waan labistaa,
“hadda waan weynahay Mama,”
ayaan dhaha.




Waxaan xidhi
karaaguluusyadeeyda iyo suunka
kabahayga.



Waxaan na hubiyaa in walaalkeyga
yar uu yaqaano dhamaan wararka
iskuulka.



Fasalka dhexdiisa waxaan ku
dadaalayaa sida ugu fiican.



Waxyaabahan wanaagsan oo dhan waxaan sameeyaa maalin kasta. Laakiin waxa aan ugu jeclahay, waa in aan ciyaaro oo aan ciyaaro!



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Zama waa mid aad u wanaagsan!

Written by: Michael Oguttu

Illustrated by: Vusi Malindi

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by [Storybooks Canada](#) in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 3.0 International License](#).